Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx.

Janaayo 10, 2022

Ku socota: Dadka, qoysaska, daryeel bixiyayaasha iyo hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)
Ujeedada: Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 oo ay ku jiraan xirmooyinka baaritaanka, qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah

Kiisaska COVID-19 ayaa si weyn kor ugu sii kacaya qaran ahaan iyo hadda Oregon dhexdeeda. Farriitani waa in qof kasta oo ka tirsan nidaamka naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) lala socodsiiyo ilaha iyo macluumaadkii u dambeeyay.

Marka hore, habka ugu fiican ee aan iskaga difaacayno cudurka halista ah ee ka imaanaya nooca Omicron waa in la dhammeysto taxanaha tallaalka, la qaato qiyaasta tallaalka xoojinta ah, la xirto maaskare si fiican kuugu galaya marka laga fog yahay guriga oo la xaddido isku soo ururka.

Marka xiga, Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC) ayaa sidoo kale dhawaan oggolaatay tilmaamaha soo socda ee loogu talagalay dadka qaatay tallaalka Pfizer taxanahoodii hore:

- In la kordhiyo qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah oo la gaarsiiyo carrruurta da'doodu tahay 12 ilaa 15 jir.
- Is la soo gaabiyo waqtiga u dhexeeya taxanaha tallaalka aasaasiga ah ee Pfizer iyo qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah oo laga dhigo shan bilood.
- In loo oggolaado qiyaasta taxanaha aasaasiga ah ee saddexaad carruurta difaaca jirkoodu liito qaarkood ee da'doodu tahay 5 ilaa 11 jir.

Qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah ayaa muhiim u ah in la iskaga ilaaliyo cudurka daran ee ka imaanaya nooca Omicron ee COVID-19. OHA ayaa goobaha tallaalka ee mugga sare leh ka sameysay gobolka oo dhan. Siyaabo kale oo lagu helo tallaalka ama qiyaasta tallaalka ee xoojinta ah:

- Wac xafiiska dhakhtarkaaga;
- ORCOVID fariin telefoon ugu dir 898211 (Ingiriisi iyo Isbaanish kaliya) ama email u dir ORCOVID@211info.org (caawimaad luqadeed ayaa la helayaa);
- Wac 211 ama 1-866-698-6155, khadka bilaashka ah, 6 subaxnimo ilaa 7 galabnimo, oo ay ku jiraan fasaxyada; ama
- Raadi goob ama adeeg bixiye kuu dhow adiga oo ka raadinaya Khariidada helista tallaalka ee Get Vaccinated Oregon.

Marka saddexaad, Oregon ayaa gadatay lix milyan oo ah xirmooyinka baaritaanka guriga oo loogu talagalay COVID-19 kaasi oo la qaybin doono Janaayo oo dhan. Xirmo kastaa waxay wadataa laba baaritaanada degdega ah, oo isugeyn dhan 12 milyan oo xirmo oo si lacag la'aan ah loogu qaybin doono dadka reer Oregon.

Dadka qaba I/DD ee ah xubnaha Maamulka Caafimaadka Oregon (OHP) waxay heli karaan ilaa afar ah xirmooyinka baaritaanka COVID-19 bishiiba oo lacag la'aan ah. Faahfaahino ayaa ku jira warqadan macluumaadka wadata 'flyers' ee ka socota OHP laakiin halkan waxaa ku qoran waxyaabaha aasaasiga qaarkood oo ay tahay in la ogaado:

- Xirmooyinka baaritaanku waa kuwo lacag la'aan u ah xubnaha ka tirsan OHP.
- Haddii aad raadinayso xirmada baaritaanka guriga, marka hore la xiriir farmashiiyayaashaada degaanka. La socodsii farmashiyaha in aad tahay xubin ka tirsan OHP.
- Haddii farmashiyaha degaankaagu wada gaday xirmooyinka baaritaanka, Mas'uuliyiinta Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka (LPHA) ayaa ah mid la dooran karo. Fadlan la shaqee Isku duwahaaga Adeegyada ama Wakiilkaaga Shakhsiyeed si aad u hesho xirmooyinka baaritaanka oo ka socda LPHA.
- Daryeel bixiyayaasha iyo Hay'adaha Maamulka Kiiska waa in ay ku xirmaan Mas'uuliyiinta Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka taasi oo ku saabsan helida xirmooyinka baaritaanka oo loogu talagalay dadka ka tirsan adeegyada.

Macluumaad guud, oo ay ku jiraan halka laga helo goobaha baaritaanka ee la imaanayo 'physical testing', waxaa laga helayaa internet-ka website-ka Maamulka Caafimaadka Oregon.

OHA ayaa leh foomka taageerada farsamo oo dhanka internet-ka ah halkaasi oo daryeel bixiyayaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo dadku/qoysasku ay codsan karaan taageerada helitaanka tallaalka COVID-19 iyo tallaalada xoojinta ah. Gaar ahaan, foomkan waxaa loogu talagalay daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay ee leh dad degan iyo shaqaale u baahan taageerada tallaalka, ama dadka helaya adeegyada guriga-dhexdiisa ee, sabab kasta ha ahaatee, aanan gurigooda ka bixi karin si ay u helaan tallaal.

Waxaan qof kasta si aad ah ugu dhiirigelinayaa in uu qaato tallaal xoojin ah si aad u ilaaliso naftaada, qoyskaaga iyo dadka aad wada shaqeysaan.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.